



AGES & STAGES QUESTIONNAIRES®

Ages & Stages Questionnaire - 3 (ASQ-3)®

Waa maxay ASQ -3?

ASQ-3 waa foom su'aafso oo diirada saaraaya kobaca cunugaaga wuxuuna tusmo gaaban ka bixinayaa heerka cunugaagu ka maraayo meelaha muhiimka ah, sida hadalka, awooda jirka, xirfadaha bulshada, iyo xirfadaha xalinta caqabadaha.

Qofkee buuxinaaya Foomka ASQ-3?

ASQ-3 waxaa buuxinaaya daryeelaha ilmaha. Wuxuu qaadanayaa 10-15 daqiqiyo in lagu dhammeyo. Waa wax fudud oo boobsiis ah.

Sidaan Ayuu u Shaqueeyaa ASQ-3:

Uga jawaab su'aal kasta "Haa," "mararka qaar," ama "maya wali" ayadoo ku xiran waxa cunugaagu awoodo inuu sameeyo waqtii xaadirkaan. Jawaabahaaga ayaa gacan ka gaysan doona inay muujiyaan awoodaha cunugaaga iyo meelaha cunugaagu u baahan yahay inuu ku tababarto.

Si aad uga jawaabto su'aal kasta, waxaad iskudayi kartaa nashaadaad baashaal leh oo fudud oo aad la samayso cunugaaga. Nashaadaadkaan ayaa ku boorinaaya cunugaaga inuu ciyaaro, socsocdo, uuna muujiyo xirfadhiisa maalin kasta.

Kadib marka aad buuxiso foomka su'aalaha, waxaad natijjooyinka kala hadlaysaa xirfadlaha cunugaaga. Si wadajir ah, waxaad go'aamin doontaan talaabooyinka xiga iyo guulaha laga filan karo mustaqbalka.

Ages & Stages Questionnaire: Social-Emotional - 2 (ASQ:SE - 2)®

Waa maxay ASQ: SE - 2?

ASQ:SE-2 waa foom su'aaleed oo kaa caawinaaya aqoonsiga awoodaha dareenka la dhaqanka bulshada ee cunugaaga iyo meelaha cunugaagu u baahan yahay in laga taageero. Kobaca dareenka la dhaqanka bulshada ee ilmaha ayaa diirada saaraaya sida cunugu u bilaabaayo fahanka qofka uu yahay, dareenka uu qabo iyo waxa ay tahay inuu ka fisho markuu la hadlaayo dadka kale.

Qofkee buuxinaaya Foomka ASQ:SE-2?

ASQ:SE-2 waxaa buuxinaaya daryeelaha ilmaha. Wuxuu qaadanayaa 10-15 daqiqiyo in lagu dhammeyo. Waa wax fudud oo boobsiis ah.

Sidaan Ayuu u Shaqueeyaa ASQ:SE-2:

Ka jawaab u'aal kasta adoo calaamadayaaya "inta badan ama markasta," "mararka qaar," ama "marar dhif ah ama marna." Ku salee jawaabta waxa aad ka ogtahay cunugaaga.

Fadlan faalooyin ka bixi haddii ay jiraan dabeeecado walaac kugu abuuray.

Xasuusnoow in jawaabahaagu ay gacan ka gaysanayaan inay muujiyaan awoodaha cunugaaga iyo meelaha cunugaagu u baahan yahay in laga taageero.

Kadib marka aad buuxiso foomka su'aalaha, waxaad natijjooyinka kala hadlaysaa xirfadlaha cunugaaga. Si wadajir ah, waxaad go'aamin doontaan talaabooyinka xiga iyo guulaha laga filan karo mustaqbalka.



Iskaan garee si aad